

**Dawladdii Kacaankii Ninkii Diidanaayow Haddeer ma-u- Ducaysaa?**  
**MMX ( Gaani), Tel:755782/41743**  
Email: [mmhgani@yahoo.com](mailto:mmhgani@yahoo.com), [mmhgani@hotmail.com](mailto:mmhgani@hotmail.com)

- |                                |                          |
|--------------------------------|--------------------------|
| 1. Dalka iyo dadkeenoo         | Dayaxaa agtiisiyo        |
| 2. Daruuraha maraayaan         | Shalay daysanaynaye      |
| 3. Qof kastoo damiirloo        | Dhibaataadu damqaysow    |
| 4. Cinwaankan u doortiyoo      | Deeleydan jiiftada       |
| 5. Waxba haygu diidine         | Diwaanka kala bixi       |
| 6. Taariikhda dib u eeg        | Malaa waan daboolaye     |
| 7. Dulucdeeda maansada         | Bal aan ku dulbaaxshoo   |
| 8. Diirka kaaga qaadee         | Sheekada ku soo durug    |
| 9. Markii qaranku dumi rabey   | Dadku waxay lahayeen     |
| 10. Haddi duqa na daashadey    | Xukunkaan isaga dego     |
| 11. Darsan mayno dabadiis      | Damaashaadka faraxana    |
| 12. waa dabbaaldegaynaa        | Hayeeshee Dadkaygow      |
| 13. Dareenkaasi socon waa      | Dannigaasi beenow        |
| 14. Wxiii layska dedey baa     | Dibadaha u soo baxay     |
| 15. Dawlad baan sugayniyo      | Darar aan ka maalnee     |
| 16. Dagaal baa aloosmoo        | Waa nalooka sii daray    |
| 17. Daydaygiyo jirrida iyo     | Mooryaan delleganoo      |
| 18. Uu soo dabaal baray        | Jabhad an distoriyo      |
| 19. Wadan xeer u daabacan      | Oo aan dankale wadan     |
| 20. Kursigaa dangiigsoo        | Dumi qaranka mahee       |
| 21. Kuwaasoo didaayoo          | Degta qori ku haystoo    |
| 22. Duurka joogi jireyoo       | Aan dabci magaloba       |
| 23. Abid filin ka daalacan     | Yaa dalkii qabsadayoo    |
| 24. Dhismayaashi dumiyoo       | Dumar Uur lahaa iyo      |
| 25. Cirroolahaba dooxdoo       | Da'yar aan cisaynoo      |
| 26. Culumaa'udiinkii           | Masjidyada ku dilayoo    |
| 27. Darmaanahan kufsigay geyin | Hablihii la deyn jirey   |
| 28. Xilliyada dagaallada       | Ku qabsaday dariiqoo     |
| 29. Maryihii ka diirto         | Dahabkiina kalabaxay     |
| 30. Dulugliyo Masaakiin        | Iyaguba dib jireyoo      |
| 31. Dabkoodii ka seexdaa       | Doollar keena lagu diley |
| 32. Wershadihii dednaa iyo     | Xusuustii dadkeenii      |
| 33. Gumaystaha la diriraba     | Diirataw heshiisoo       |
| 34. Barqaa dibadda loo raray   | Dugsiyadi tacliintiyo    |
| 35. Jaamacadii dalkeenee       | Dhali jirey ditoo iyo    |
| 36. Injineer digriiloo         | Dalkayaga anfici laa     |
| 37. xarumihii dalxiiskiyo      | Gobihii daweyntee        |
| 38. Dadweynuhu jeclaa iyo      | Wixii dabaqyo dhaadheer  |
| 39. Ee dawlo leedahay          | Dalkayagu lahaan jirey   |

40. Xamar ha u darraatee  
41. dukun-daakun laga dhigay  
42. Daawashadaa lahaabaa  
43. Madaafiici dumisoo  
44. Dalka madaxdi joogtiyo  
45. Damaashad u soo kacay  
46. Meel aan dawacadiyo  
47. Dundumooyin laga yeel  
48. Dawladduba lahaayeen  
49. Sidii geel dar loo horay  
**50. Tiro laguma deyi karo**  
**51. Halkaa iigu sii dabar**  
**52. Midkaloo kasii daran**  
53. Degta qori ku qaatiyo  
54. Iyagaa is doontaye  
55. Dareen li' useexdoo  
56. Madfacdalaq u soo yiri  
57. Dagdaguugan kaga dhigay  
58. Maxaa degello barakacay  
59. Mid diyaaarad raaciyo  
60. Mid dameer ku guuriyo  
61. Baddo dulugle socoshaba  
62. Ninba meeshu door biday  
63. Qaxootigi dadkeenaa  
64. oo dacalladaa yurub  
65. Dabcigoodi yeeshoo  
66. Marba dhanudillaamoo  
67. Dangiyo haruuroo  
68. Boqolboqolka dibadaha  
69. Dalka hadday yimaadan  
70. Dadka ciday afgaraniyo  
71. Diintoodu say noqon  
**72. weli igama daadegin**  
**73. Darbaddaas xiroo dhaaf**  
**74. Iminkana kusoo durug**  
75. Haddii dunida laga tegey  
76. Linkolona dabarjaray  
77. Donyaha tahriibtaa  
78. Iyagoon dekada geyn  
79. Duledkeda yamanoo  
80. Qaarbabayba doonyuhu  
81. Ama doomihii sidey  
82. Shooxayd daamankis iyo  
83. Weli an dib loo arag  
84. Inuu doolar lacageed  
85. Dillaaliin la socotiyo
- Gelin baa la dumiyoo  
Daarihii wacnaayee  
Kaare deedamaayiyo  
Marti dalal shisheeyiyo  
Ruuxii dalxiisee  
Hoteelladii la degi jirey  
Dumaduhu ku hoyan iyo  
Hantidii dadweyniyo  
Ee layska dawdabey  
Abwaan gabay dabeebtiyo  
**Darbaddaas xiroo dhaaf**  
**Iminkana ku soodurug**  
Nin dagaal u kacayoo  
Xabbaddii dilaysaa  
Maxaa qoys dug yiriyoo  
iyagoon digniin qabin  
Oo dad iyo duunyaba  
Daalaadhacyayntii  
Gaariweyn dushiis iyo  
Miday dooni qaaddiyo  
Dantu miday lugayn iyo  
Geeddigu is dabahay  
dadweynuhu u kalayaac  
Gypsy duul la oran jirey  
Dalanbaabi soconjirey  
Daafaha adduunyada  
Waxaa loo dawariyaa  
Da'yartiyohaweenkaan  
Loogu daabulaayaa  
Iyagoo la digarogey  
Dabcigay la iman iyo  
Waa su'aal da'weynoo  
**Malaa waan ku daahaye**  
**Halkaas iigu sii dabar**  
**Midkaloo kasii daran**  
Geddiskii dadweynaha  
Hadday dalakan kow tahay  
Lagu daabulaayoo  
Ayay waxay ku daadshaan  
Dayac iyo dhib weeyee  
Badweyn kuladegenoo  
Khasab looga daadshoo  
Dalqo nibiri galayo  
Dadna ay ka sugayaan  
Uga keeno dibadaha  
Kuwa gala dunuubtaas

86. dadkaa loo badshaayoo  
87. Darxumo iyogaajiyo  
88. Imisaa dad ugu go'ay  
89. Markii webigu deyrkiyo  
90. Imisuu la tegey daad

**91. Malaa waan ku daahaye**

92. **Halkaa iigu sii dabar**  
93. Mid kaloo kasii daran  
94. Duurjoogtadiibaa  
95. Dhirtii baa la diirtoo  
96. Khaliij loo daldalayaa  
97. Dillaalliin shisheeyiyo  
98. Doorkii waddanigiyo  
99. Doollar lagaga iibsaday  
100. Wershadaha dal reer yurub  
101. Soo daadinaayaan  
102. Dalkeennay ku duugaan  
103. Rabbi noogu deeqana  
104. Markabbo iyo doonyaa  
105. Jiriif kula dabaashoo  
106. Sidaa looma deyi karo  
107. Difeetooyinkaas jira  
108. Dillaal buu ka qatoo  
109. Ruuxii damqanayee  
110. Iska daawo mooyee

**111. Malaa waan ku daahaye**

**112. Halkaas iigu sii dabar**  
113. **Mid kaloo ka si daran**  
114. Keenya duudsiyaysoo  
115. La doontaa ha joogee  
116. **Land** iyo wax lagu dabay  
117. Midba dawlad gaaroo  
118. Degaanki nabadee  
119. Dawlad dhexe ku sugaya  
120. Qaar dawlad gaariyo  
121. Qaar degaanadoodii  
122. Dulugle iyo cayroo  
123. Daaqa geedaha jira  
124. Iyo dhiig la daadshiyo  
125. Daroogiyo sidii qaad  
126. Dawlada shisheeyaa  
127. Midi waxay danmoodaba  
128. Intii dibuheshiisiin  
129. Ayaa kuu daliilee

Sidaa looma deyi karo  
Macaluul daraadeed  
Duleedkeeda Baydhabo  
Jebshey daafihiisii  
Oo aan daryeel helin

**Darbaddaas xiroodhaaf**

**Iminkana ku soo durug**  
Duunyo dheddig ahayd iyo  
Loo dhoofshay dibaddoo  
Dabna qaar la surayoo  
Denbigaas waxaa falay  
Dad soomaaliyeedoo  
Damiirkay lahaayeen  
Qashindool ku yimiyoo  
Ama dawaladaha kale  
Illeyn dawlad malihine  
Badweyntii dihnaydee  
Durba xaaluf weeyoo  
Dammaanado la siiyoo  
Sunta qayb ku duugoo  
Deegaan hallayntiyo  
Dufan tirasho gabanniyo  
Qabqabluhu dan kama laha  
Difeetda arkaayana  
Talaan dabarka ugu jirin  
**Darbaddaas xiroo dhaaf**  
**Imminkana kusoo durug**  
Dalkii naga maqnaayoo  
Xabashidu ku durugtoo  
Degaankii yaraabaa  
Intii laysku dabakaray  
Doc u taagan laga dhigay  
Maamulkuu diyaarsaday  
Inkastayba daw tahay  
Goosi doonayaa jira  
Dad kaleto haystoo  
Intay duurka aaden  
Qaaraan dagaalkii  
Ka da' furin colaaddoo  
Dilka qabatimaa jira  
Dalka ku herdamaayoo  
Tan kaladuqaysoo  
Iyo shirar la daba furay  
Madafiri karaynaa?????

130. Iga hoo Daliil kale	Dagaalkan haddeer Xamar
131. Argagixisa doonkiyo	Argagixisa diidka ah
132. Dad aan kuu naxayn iyo	Dawlada kalaa wada
133. Denbi laawayaashiyo	Danyarta iyo maatada
134. Dariiqyada magaalada	Madfacyadu ku dilayaan
135. Kuwa soo diraayiyo	Kuwa laygu soo diray
136. Waa ku diirsadaanoo	Danab aan jeclayn iyo
137. Markaan diric ku weynaba	Farxad bay dillaacaan
138. Haddii dunidu lagu dheho	Dadka maxaad u laysaan
139. Durbadiiba waxay oran	Denbi maanu gelinoo
140. Dabka hawtulhamaguba	Ogow waa ku daataan
141. Mana looga diir naxo	Dadkuu horay u laayiyo
142. Dab xoogloo u haystiyo	Wasiir dirirta awgeed
143. Doorashada ku helay shalay	Si uu derejo sare iyo
144. Doollar badan u siihelo	Waa inuu dadkii haray
145. Digaxaarka mariyaa	Wadaadada docdoodana
146. Denbi niman ka gelin iyo	Dan yarta iyo shacabkan
147. Hoobiyaasha lagu diley	Daliikay u haystaan
148. Diinta lagama heli karo	Haddaad eegto docal kale
149. Dalka beretan baa yaal	Degaan uu ka taliyiyo
150. Ruuxii dab haystiyo	Ciidan iyo dabaabaad
151. Ama daadshey dhiig badan	Xilliyadi dagaallada
152. Dalka madaxda joogtee	Derejada sugaysuu
153. Yahay kuwa u door-roon	Wadaadaduna doorkaas
154. Inay daalibaayaan	Inkastuu denbina dhalo
<b>155.</b> Danni saas ah baa jira	Hayeeshee doc kale eeg
<b>156.</b> Xamar dacalladeediyo	Degaamada u dhowdhow
<b>157.</b> Amnigoodu waa degey	Dekadiyo madaarkii
<b>158.</b> Dabranaa sabaanadu	Durba waw diyaar shaqo
159. kolka lama dafiri karo	Dayaxaa iftiimiyo
160. Nuurka haatan daalacay	dadku inay ka helayaan
161. Nolol derejo wacanoo	Kuwii duudsiyaayiyo
162. Qabqablihi ka door-roon	Haddaan duubka culimada
163. Arrin laysku dagayiyo	Dan qabiil ku hoos jirin

<b>164.</b> Darbaddaas xiroo dhaaf	<b>Halkaa iigu sii dabar</b>
<b>165.</b> Halkaas iigu sii dabar	<b>Iminkana kusoo durug</b>
166. Mid kaloo kasii daran	Dhallinyaradu diritiyo
167. Dagaal oogayaashay	U durbaan tumaanoo

168. Waa lagu dan-gaaraha	Aan dantooda gaarinoo
169. Doorkii SYL	Dadgelaaya maahoo
170. Damiirlaawayaalow	Dalkooday gubaanoo
171. Waa xaabo iyo duur	Dabka lagu shitaayoo
172. Dareenkii waddaninimo	Qalbigooda kuma duxin
173. Wuxuu wax u dilaayiyo	Waxa loo dilaayana
174. Midna uma dareen qabo	Haddana diidey kuma dhaco
175. Dadarta iyo jaadkiyo	Daroogiyo xashiishiyo
176. Wuxuu dankaa geliyon	Dalqadiisa qoyn buu
177. Noloshaba ka door biday	Waayaha dalkoodana
178. Kama hayso daniyoo	Dammanaanshohoodana
179. Abwaan iga da'weyn iyo	<b>Gaarriyaa</b> Dabeebto
180. da'da manta joogtaa	Haddii loo kitaab deyey
<b>181. Waxay daaqdo mooyee</b>	<b>Waxay deeqdo lama arag</b>
182. Darxumantahaysiyo	Diifta waxa u sii dheer
183. Naafada dagaalkiyo	Dhaawacu daryeel maleh
184. kiidhintay dadkiisiyo	Agoontana warkeed daa
185. Dalka madaxdan joogtee	Ay dhaleen duruufuhu
186. Dib usocod la ururshiyo	Waa koox dallaganoo
<b>187. Dareenwadaha maqalkiyo</b>	<b>Gawsaha dalqada ku leh</b>
188. Dibindaabin mooyee	Dalka inay hormariyaan
189. Ama boog daboolaan	Waa xalay habeen dumey
<b>190. Darbaddaas xiroodhaaf</b>	<b>Halkaas iigu sii dabar</b>
191. iminkana kusoo durug	<b>Mid kaloo kasiidaran</b>
192. Aqoonyahan digriilo	Jaamacado dibaddiyo
193. Dalka soo dhammaystaa	Derbiyada magaalada
194. Daalaadhacaayoo	Dibjir loo maleeyaa
195. Halka shaqada loo diro	Nin daab godimo soo goo
196. Degree aan ka badan sidan	Taajir door ahaayoo
197. Doonyiyo maraakiib	Dadahaysan jireybaa
198. isagaiyo dadkiisii	Derisyada shaxaadaan
199. Sarkaal duurkagalayoo	Duunyada ku raacdo
200. Dirayskiiba tuuroo	Jabhadkii dorraad yimi
201. Maanta derejo dhaamiyo	Daannoyin baa yimi
202. Dabaqadihii hoosaa	Yimi dacalka sare oo
203. Waqti baa is adaba maray	Ditoor midan ahaynoo
204. Duurka shalay ka yimiyoo	Danbiil lacag ah helaybaa
205. Inta daas yar loo furay	Dawadii qorayoo
206. Duumadiyo Qaaxada	Isku si buu u daaweyn
207. Taas waxa daliil u ah	Dalka cudurrobadanbaa
208. dawadii la qabatimay	Oo anay dili karin
209. Wixii lagu daweyn jirey	Kahor dawlad li'daan
210. Arrintaasi diif iyo	Dibindaabyo weyn bay
211. Dadweynaha ku haysaa	Dilka iyo dagaalkii
212. Duunyo kaldhici &	Markay badatay dirirtii
213. Cudur maanka daariyo	Dadkii Buufis baa helay

214.Qofkilagudaremona Dumadaha madow iyo  
215.Deriskiyo xigalkiyo Gacalkuu ka didayaa  
216.Hebel baa idilayiyo Hebel baygu soo diray  
217.Ayuun baw dabeecada Dirayskiyo dharxirashada  
218.Waa sida dadko kale Maskaxduna daleel maran

**219.Malaa waan ku daahaye**  
**220.halka igu sii dabar**  
221.**Dulucdeeda maansada**  
222.Wixii adiga kuu daran  
223.Markaas kaa dahsoonbaa  
224.Taana waxa daliil u ah  
225.Debi waa la haydoo  
226.Cadceed taagan duhurki  
227.Markii uu duqii tegey  
228.Dibindaabyo mooyee  
**229.Dawladdii kacankii**  
**230.Haddeer maw ducaysaa?**

**darbaddaas xiroodhaaf**  
**Imminkana kusoo durug**  
Waan la wada dareemine  
Waxkaloo ka daranoo  
Illeyn kaaga sii daran  
Dawladdii horeetaba  
Ma dafiri karaynoo  
Sacab laguma daahee  
Raggii noo durbaan tumay  
Maxay derejo keeneen  
**Ninkii diidanaayow**

231.Dalkan aan ku noolnahay Dadka haatan joogaa  
232.Waa oday diriskoo Isma derejo dhaantoo  
233.Duqii hore hadduutegey Daawobid guud iyo  
234.Doorsashaa la sugayiyo Qarankoon daryeelee  
235.Waxa timi kasii dara Dalki lama xasilinoo  
236.Dagaalkii ma joogsane Dacallada dalkoo idil  
237.Jifi iyo dan hoosaa Loogu wada dagaalamay  
238.Oo duulba wuxu diley Duulki haybta ugu xigeey  
239.Anaa kaa dun wacan iyo Anaa kaa dadnimo roon  
240.Dadkii shalay sidaas qabey Dannigoodi socon waa  
241.Taa waxa daliil u ah Weli dunida lama arag  
242.Dad dhan oo heshiis ku ah In wax dawlo leedahay  
243.Dukundaakun laga dhigo Doc kastaba ha yaallee  
244.Daliilkeedu taas waa Docda xamar dagaal iyo  
245.Dirir aan go'aynbaa waxa loogu dawgalay  
246.Daaraha jajabay iyo Dar xumaanta gaadhaye  
247.Bal degmada caluulaay Dumiseye wershadihii

248. Yaa kugu dagaallamay? !!!!! Docda reer waqooyiga  
249. Xilliyadii Dagaallada Denbi dad an lahaynbaa  
250. Loo diley dammane yohow Maxaw noqotay duulkaas  
251. Maad noqotid duulkaas Dagaalladi sokeeyaha  
252. Danbarkoodi maalaye Deriskoo is nacay iyo  
253. Denbi iyo dhib mooyee Maxaa derejo laga helay  
254. Dad-horaa tilmaamoo Danab inad ku weydiyo  
255. Diric ad jeclayd iyo Nin doorkaaga moyee  
**256. Dagaal laguma dhalowiil Darbaddaas xiroo dhaaf**  
**257. halkaa iigu sii dabar Iminkana ku soo durug**  
**258. taladayda doorka ah Iyo halal dardaran ah**  
259. Shacabyohow deyeysani Ninka daadahaynta  
260. Inta duub isugu xiray Dumintaa u kicitimay  
261. Adigoon danta bogan Oo degel cidla' ah yal  
262. Ninka tiisa door biday Taadina daayacay  
263. Danbarsame hanaadiyo Ninka doogga kaa raray  
264. Oo dula qaninliyo Dikhda shilinta badan iyo  
265. Abaartaas deg kugu yiri Dadkiisiina dhoofshoo  
266. Tacliin yurubta ugu diray Dabka idinku shidi jirey  
267. Intay kuu dirsanayaan Hadba meesha kuu daran  
268. Ee dabargo' aaga ah Adna aad ku daban tahay  
269. Dacaskiyo dhibaatada Iyo diifta kugu taal  
270. Marna inay ku daayaan Waa xalay habeendumey  
271. Illeyn diidey ma oggolid Wixi adiga kuu daran  
272. Inaad doontid mooyee
273. Dulucdi abwan hore Aan uga dab qaatee  
274. Daartiisa aakhiro Daa'im haw qaboojee  
275. Duqii tima caddee yiri Dugsi male qabyaaladi  
276. Waxay dumiso mooyee Marki aad ka diidana  
277. Dadkaan la hadlayaa yiri Giddi waa dix dhagaxeed  
278. Denbi looga qori maa!!!!!!!!!!!!
279. Dan ka hadalka taydana Inta uu dadkaygii  
280. Sagaaradu dar loo dhigay Dibnahaa ma saartiyo  
281. Waa durduurataa ay Isku wada dilaayaan  
282. Taladii dantayda ah Ama dabargo' ayga ah  
283. Inta dawlada kale Fuli igu dirqiyayaan  
284. Oonan diidi karihayn Anigaysu dacayaye  
285. Dusha kama babanayee Inta calanku daw dheer  
286. Duuduubka ugu jiro Dalku kala qoqoban yahay  
287. Shacabkuna damane yahay Dufan raac yar mooyee  
288. Aqoonyahan dabrane yahay Derejadana lagu helo  
289. Oo SII FIIGA lagu daro Denbilaawayaal iyo  
290. Kumanaan qof baan diley Xilliyadi dagaallada  
291. Deyn maayo taladiyo Deellayda gabaygiyo

292. Inaan kula dardaarmee

Ila soco dadkaygow